# FAAFINTA RASMIGA AH

الجريـــدة الرسميــة

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho, 15ka Abriile 1988, Lr. 1 R 4

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU**: waa 5 shiilin lambar walba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee

K O O B N I I N

QAYBTA KOWAAD

S H A R C I

W. M.

QEYBTA LABAAD

X E E R

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 24 ee 8 Dis. 1987, Magacaabid Nootaayo BOG. 270

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 25 ee 20 Maarso 1988, Dallacaad 1 (hal) Darajo, ah oo la Mutaysiinayo, Dr. Axmed M. Maxamuud » 271

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 26 ee 6 Maarso 1988, Soo Saarid Lacag Cusub. » 272

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH.

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 23.3.88, Lumid J/War. L. 0656936 ku qoran C/qaadir Xasan Muumin L. 173 » 273

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 17.3.88, Lumid J/War. L. 0675613 ku qoran Isaaq Ibraahim Isaaq L. 174 » 274

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 26.3.88, Lumid J/War. L. 0695299 ku qoran Maxamed Barow Maxamuud L. 185 » 275

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 26.3.88, Lumid J/War. L. 0052034 ku qoran Maxamed Barow Maxamuud L. 176 » 276

MAXKAMADDA GOB. W/GALBEED 5.3.88, Lumid J/War. L. 0868760 ku qoran Daa'uud X. Aw Cawaale L. 177 » 277

MAXKAMADDA G. W/GALBEED, 22.3.88, lumid Jeeg War. L. 0602167 ku qoran Gahayr Cali Xandule L. 178 » 278

MAXKAMADDA G. BANAADIR, 30.3.88, Lumid Jeeg War. L. 0630282 ku qoran Axmed Maxamed Barre L. 179 » 289

MAXKAMADDA G. DEG. BERBERA, 26.3.88, lumid 2 Jee War. ku qoran Axmed Yaxye Qaasim L. 180 » 280

MAXKAMADDA G. DEG. BERBERA, 18.7.87, lumid 2 Jeeg War. ku qoran Baaruud Cumar Xaamuud L. 181 » 281

MAXKAMADDA GOBOLKA DEG. BERBERA, Tr. 26.3.88, Lumid 2 J/War. Ku qoran Xasan Yaxye Qaasim L. 182 » 282

MAXKAMADDA GOB. Sanaag, 10.3.88, Lumid 2 J/War. Ku qoran Faaduma Yuusur Jaamac L. 183 » 283

## QAYBTA LABAAD

### XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 24 ee 8 Dis. 1987 Magacaabid Nootaayo.

### MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka JDS, Qodobkiisa 82aad;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lr. 8 ee 15.2.1961 iyo lr. 1 ee 2.3.1962 oo ku wada saabsan habeynta hawlaha Nootaayada;

ISAGOO ARKAY: Sharciga lr. 7 ee 2.2.86 ee ku saabsan Mihnada Nootaayada;

ISAGOO TIXGELINAYA: Talada uu soo jeediyey Wasiirka Garsoorka iyo A. Diinta.

### WUXUU SOO SARAYAA

Xeerka soo socda:

### Qodobka 1aad

Ayadoo la tixgelinayo Qodobka 2aad ee Sharci lr. 7 ee soo baxay 2.2.1986 laga bilaabo taariikhda uu dhaqan galo Xeerkan Jaallaha magaciisa hoos ku qoran waxaa lagu magacaabayaa Nootaayo Xamar.

Dr. Maxamed Macallin Yuusuf (Notaayo Xamar)

### Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa markuu saxiixo Madaxweynaha JDS, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 8 Dec. 1987

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

WASIIRKA W.M. IYO L.
(Dr. Cabdiraxmaan Jaamac Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 25 ee 20 Maarso 1988

Dallacaad 1 (Hal) Darajo ah oo la Mutaysiinayo J.le Dr. Axmed Maxamed Maxamuud (Isay).

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Dastuurka JDS;

MARKUU ARKAY: Sharciga Shaqaalaha Dawladda ee Lam. 5 ee 2.2.1980;

MARKUU ARKAY. Soo-jeedinta Guddoomiyaha Bankiga Dhexe ee Soomaaliya.

WUXUU XEERIYEY

Qodobka 1aad

Laga bilaabo 24.10.1987 waxaa loo dallacsiiyey J.le Dr. AXMED MAXAMED MAXAMUUD (ISAY) — Agaasimaha Guud ee Bankiga Dhexe ee Soomaaliya — Derejada A/2 (Sh.So. 1.500).

Muqqdisho, 20ka Maarso 1988

MADAXWEYNAHA JDS

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 26 ee 6 Maarso 1988 Soo saarid Lacag Cusub.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qodobka 82 Dastuurka JDS xarafka 14aad iyo sharciga Lr. 1 ee 21kii Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Qodobka 5aad ee Xeerka Lr. 2 oo soo baxay 26kii Maarso 1961 kuna saabsan nidaamka Lacagta Soomaalida;

ISAGOO TIXRAACAYA: Baahida loo qabo in la caddeedeeyo tirada lacagta Xaashida cusub oo Shilin Soomaaliga ah ee la doonayo in la soo saaro;

WUXUU SOO SARAYAA

Xeerka soo socda:

Qodobka 1aad

b) 30.000.000 (soddonmalyan) oo xaashida 100 (boqol) shilin qiimaheeduna yahay Sh.So. 3.000.000.000.= (saddexbilyan) oo ah 30 horin «series» kana billowda lambar 000001 ilaa 1000000 oo sita xarafka «D» oo ka dambeeyo lambar 91 ilaa 120.

t) 20.000.000 (labaatanmalyan) xabo oo xaashida 50 (konton) shilin qiimaheeduna yahay Sh.So. 1.000.000.000.= (halbilyan) oo ah 20 horin «series» kana billowda lambar 000001 ilaa 1000000 oo sita xarafka «D» oo uu ka dambeeya lambar 96 ilaa 115.

Qodobka 2aad

Lacagta xaashida cusub oo ah min 100 iyo 50 shilin Soomaali oo qodobka kore lagu tilmaamay waxay leedahay summadaha u gaarka ah iyo tilmaamaha ku saabsan xagga farsamada iyo farshaxanka oo ku qeexan xeerka lambarkiisu yahay 67 ee 30.12.1982. Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 6 Maarso 1988

MADAXWEYNAHA JDS
(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA SAD/XAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO W.M.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdulqaadir Xasan Muumin;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0656936 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 22.250 kuna qoran magaca J.le Cabdulqaadir Xasan Muumin sida ku cad warqadda lam. 4053 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0656936 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 22.250 kuna qoran magaca J.le Cabdulqaadir Xasan Muumin.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso Jaalle Cabdulqaadir Xasan Muumin lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 22.250 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 23.3.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 173

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Isaaq Ibraahim Isaaq;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0675613 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 22.250 kuna qoran magaca Jaalle Isaaq Ibraahim Isaaq sida ku cad warqadda Lam. —— ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0675613 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 22.250 kuna qoran magaca Jaalle Isaaq Ibraahim Isaaq

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad in ay siiso Jaalle Isaaq Ibraahim Isaaq lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 22.250 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.3.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 184

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY. Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Barow Maxamuud;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0695299 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Jaalle Maxamed Barow Maxamuud sida ku cad warqadda lam. 3110 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0695299 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Jaalle Maxamed Barow Maxamuud.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad in ay siiso Jaalle Maxamed Barow Maxamuud lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lag udaabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.3.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 175

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Barow Maxamuud;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0052034 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 17.500 kuna qoran magaca Jaalle Maxamed Barow Maxamuud sida ku cad warqadda lam. 3110 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lr. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0052034 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad kuna jirto lacag dhan Sh.So. 17.500 kuna qoran magaca Jaalle Maxamed Barow Maxamuud.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad in ay siiso Jaalle Maxamed Barow Maxamuud lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 17.500 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.3.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 176

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

MGH/14/88 Taariikhda 5.3.88

UJEEDDO:- Digreeto cusboonaysiin Jeegga Wareega ee lumay Lambarkiisu yahay 0868760 ee 26.6.87 ee Lacagtiisu tahay 100,000 Sh.So, kuna qoraa Daa'uud X. Aw Ca-Waale, laga sameeyey Bangiga Laanta 1aad Hargeysa.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga ay soo qortay Cibaado Warsame Siciid, ee ku taariikhaysan 1.3.88, ee ay ku codsanayso in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee lumay ee sare ku qoran;

MARKUU ARKAY: Xaashida ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad ee Hargeysa ee Lambarkeedu yahay 001523 ee 3.3.88, ee ay ku caddeeyeen in Jeeggaas sare ku qoran lacagta iyo taariikhda iyo laanta iyo magaca ku qoran ujeedada ay dhan yihiin;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangigu Laamihiisa oo dhan u kala diray kuna xayiray Jeeggaas in lacagtiisa la bixiyo, taarkaasina ku taariikhaysan yahay 20.2.88;

MARKUU ARKAY: In Jeeggaas Lacagtaas ku qoran ay iska leedahay Cibaado Warsame Siciid;

MARKUU ARKAY. Qodobada 69-70 ee Xeerka Lambar 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In la kansal gareeyo Jeegga Wareega ee lumay lambarkiisu yahay 0868760, loona cusboonaysiiyo Gabadha la yiraahdo CIBAADO WARSAME SICIID, cusboonaysiintana gacanta laga saaro muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib marka ay Faafinta Rasmiga ah ku soo baxdo, gabadhaas ama ciddii awood buuxda ka haysata.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Hargeysa in uu Nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata ama dan ka leh ee Jeeggaas lumay ay cabasho uga soo qortaan haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda G. W/Galbeed Hargeysa
(Maxamuud Maxamed Ismaaciil)

Kaaliyaha Maxkamadda G.W/Galbeed Hargeysa
(Axmed Wacays Maxamed)

L. 177

MAXKAMADDA G/DEGMADA BERBERA

MGDB/12/88 Taar. 26.3.88

UJEEDDO:- Lumid Jeegagga kala ah (1) J/Lr. A-1033455 lacag dhan 100.000 sh, (2) J/Lr. A 1033456 lacag dhan 100,000 Sh.

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Degmada Berbera

MARKUU ARKAY: Dacwadda uu soo qoray Axmed Yaxye Qaasim degan degmada Berbera kuna taariikhaysan 24.3.88 kuna saabsan in loo caddeeyey Jeegagga kor ku qoran lumistooda;

MARKUU ARKAY: Taarka baafinta ah ee laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Berbera kuna taariikhaysan 19.3.88 ayna ku caddahay baafinta laga fidiyey Jeegaggaasi loona gudbiyey qaybaha kala gedisan ee Bangiyada dalka;

HADDUU ARKAY. Qodobka 69-70 X.L.Y. (2) ee 9.9.65 waxaa caddaatay in labadaasi Jeeg ee Wareega ee kor ku qoran magaca ku qorani yahay Xasan Yaxye Qaasim ka lumeen ninka layiraahdo Axmed Yaxye Qaasim oo isagu iska lahaa Jeegaggaasi.

SIDAASI DARTEED:- WUXUU AMRAYAA

In marlabaad loo cusboonaysiiyo labada Jeeg ee kala ah: (1) A-1033455 lacagtiisu tahay 100.000 Sh. (2) A-1033456 lacagtiisu tahay 100.000 Sh. Axmed Yaxye Qaasim oo ay ka lumeen isaga gacantiisa kuna qornaayeen magaca Xasan Yaxye Qaasim muddo 30 beri gudahood ah, kadib marka Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda lagu qoro waa in gacanta laga saaraa Axmed Yaxye Qaasim ama qof ka sita awood sharci ah haddaan lahayn cid sheegata, 30ka beri waa in la sugo.

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Degmada Berbera

(Dr. Shawqi Cilmi Cali)

Kaaliyaha Maxkamadda G. Deg. Berbera

(Sahal Dayax Weerar)

L. 178

MAXKAMADDA G/DEGMADA BERBERA

MGDB/F=22/88 Taar. 18.7.87

UJEEDDO:- 1) Lumid Jeegga Wareega Lr. 0714242, lacagtiisu 100.000 Sh. 2) iyo Jeegga Lr. 034767, lacagtiisu tahay 30.000 Sh.

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Degmada Berbera

MARKUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Baaruud Cumar Xaamuud ee 16.7.87 uuna ku codsanayey in loo caddeeyo Jeegagga ka lumay ee kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: Baafinta Taarka ah ee ay qoreen Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Berbera ee ku taariikhaysan 30.6.87 una direen qaybahooda kala gedisan ee dalka lumista Jeegaggaasi;

MARKUU ARKAY: Qod. 69-70 L.2 9.9.65 2 waxaa caddaatay Jeegaggaasi Wareega ee lambarradoodu yihiin 1) Lr. 0714242 100.000 Sh. iyo 2) Lr. 034767 30.000 Sh.So. kuna qoran magaca Baaruud Cumar Xaamud oo iska lahaa kana lumeen Jeegaggaasi kor ku qoran;

MARKUU ARKAY: Warqadda Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Berbera uu ku caddaynayo lumista Jeegaggaasi.

SIDAASI DARTEED:- WUXUU AMRAYAA

In loo cusboonaysiiyo marlabaad Jeegaggaasi Wareega ee lambarradoodu kor ku qoran yihiin oo kala ah 1) 0714242 lacagtiisu 100.000 Sh. 2) 034767, lacagtiisu 30.000 Sh. muddo 30 beri ah gudahood, kadib marka lagu qoro Faafinta ee Dawladda, haddaan lahayn qof sheegta waxaa gacanta laga saarayaa ninka la yiraahdo Baaruud Cumar Xaamud oo asagu iska leh kana lumeen Jeegaggaasi 30 ka beri waa in la sugaa.

Guddoomiyaha Maxkamadda G/Degmada Berbera

(Dr. Shawqi Cilmi Cali)

Kaaliyaha Maxkamadda G. Deg. Berbera

(Sahal Dayax Weerar)

L. 179

MAXKAMADDA G. W/GALBEED HARGEYSA

MGH/18/88 Hargeysa 22.3.88

UJ:_ Degreeto cusboonaysiin J.W. lumay lambar yahay 0602167 ee 23.1.88 Sh.So. 50.000 ku qornaa Gahayr Cali Xandulle laga sameeyey Laanta 1aad ee Hargeysa.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed Hargeysa

MARKUU ARKAY: Arjiga ah codsiga ee uu Maxkamadda u soo qortay ninka la yiraa Cali Faarax Geele ee uu ku codsanaayo in loo cusboonaysiiyo J.W. lumay ee kor ku xusan;

MARKUU ARKAY: Taarka Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa u kala diray Laamihiisa iyo xisaabaha guud ee 28.1.88;

MARKUU ARKAY. Xaashida Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa ee uu Bangigu ku soo caddeeyey in uu Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusani uu iska leeyahay Astaamaha Ujeedada sare ku wada xusan;

MARKUU ARKAY: In lacagta ku qoran Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan uu iska leeyahay ninka la yiraa Cali Faarax Geele;

MARKUU ARKAY: Qodobada 69_70 ee Xeerka Lambarkiisu yahay 2 ee soo baxay 9.9.65kii.

WUXUU GO'AAMIYEY

In Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan la kansan gareeyo, loona cusboonaysiiyo; cusboonaysiintana gacanta laga saaro ninka la yiraa Cali Faarax Geele ama ciddii awood buuxda ka haysata muddo 15 maalmood gudahood ah ka dib markii Faafinta lagu soo saaro.

WAXAA LA FARAYAA

Maamulaha Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Hargeysa in uu Nuqulka go'aankan ku dhejiyo Bangiga Irdihiisa si ciddii haysata Jeeggaasi Wareega ee lumay ee kor ku xusan ay uga soo qortaan cabasho haddii ay doonaan.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka W/Galbeed Hargeysa
(Maxamuud Maxamed Ismaaciil)

Kaaliyaha Max. Gob. W. Galbeed Hargeysa
(Axmed Wacays Maxamed)

L. 180

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Maxamed Barre;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0630282 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Maxamed Barre sida ku cad warqadda lam. 13267 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Q.X.G.

HADDUU ARKAY. Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.62kii.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lr. 0630282 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso kuna jirto lacag dhan Sh.So. 50.000 kuna qoran magaca Jaalle Axmed Maxamed Barre.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Boosaaso in ay siiso Jaalle Axmed Maxamed Barre lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 50.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku oran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 30.3.88

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 181

MAXKAMADDA GOBOLKA SANAAG

MGS/L/89/88 10.3.88

BEDELAAD J/WAR. LAM. 0479650 iyo 0479651.

MARKUU ARKAY: Codsiga Tr. 4.3.88 ee ay Maxkamadaan u soo qoratay Faaduma Yuusuf Jaamac Soona codsatay in loo baafiyo 2 Jeeg laga xaday.

MARKUU ARKAY: Waxa uu ku saabsan yahay codsigaasu.

MARKUU ARKAY: Ogeysiiska Bankiga Ganacsiga iyo keyd ka L/Cerigaabo sida ku cad warqadda SUM. 00031 ee 9.3.88, taasoo ay ku cadahay inay lumeen Jeegag War. ee kala ah 1). J/W. 0479650 ee 5.12.87, kuna qoran tahay Lacag dhan (50.000) konton kun oo shilin iyo 2) J/W. L. 04479651 ee 5.12.87, kuna qoran tahay lacag dhan (40.000) Afartan kun oo shilin lacagta ku qoran Jeega gaasna ay iska lahayd, Faadumo Yuusuf Jaamac isla markaas magaceedu ku qornaa Iyadoo laga baafiyey Jee gagaas Bankiga Ganacsiga iyo kaydka Som. L/Cerigaabo Tr. 12.12.87.

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.9.65 N. 2 Lumid Jeegag Wareega.

WUXUU AMRAYAA

In la cusboonaysiiyo Jeegagga kala ah J/W. 0479650 iyo J/W. 0479651, ka dib markii ay ka soo wareegto muddo dhan (30) maalmood marka go'aanka lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA CODSANAYAA

In Jeegga cusub ee la samayn doono gacanta laga saaro J/le Faadumo Yuusuf Jaamac ama qof iyada ka sita wakaa lad sharci ah, iyadoo la sugayo mudada kor ku xusan.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. SANAAG

Dr. Cabdi-Raxmaan Sh. Maxamed.

L. 182

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Cali Yuusuf Maxamed.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 1085124 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Baydhabo kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000 kuna qoran magaca J/le Isaaq Yuusuf Mursal sida ku cad Warqadda lam. 3466 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Qeybta Xisaabaadka Guud.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 1085124 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Baydhabo kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000 kuna qoran magaca J/le Isaaq Yuusuf Mursal.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Baydhabo In ay siiso J/le Cali Yuusuf Maxamed lacagta cadeyntu tahay sh.so. 100.000 oo ah bedelkii J/War. Kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bil aabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa wax is hortaag ah aa laga keenin.

Muqdisho, 9.4.88

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi

L. 183

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xaaji Maxamed Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 3 Jeeg War. Lam. 0629673-0629674-0629675 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera kuna jirto mid walba lacag dhan Sh.So. 50.000 isugeyn Sh. So. 150.000 kuna qoran magaca Jaalle Xaaji Maxamed Axmed sida ku cad warqadda Lam. 000549 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In labaabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga Wareega ee Lam. 0629673-0629674-0629675 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 150.0000 kuna qoran magaca Jaalle Xaaji Maxamed Axmed.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Berbera in ay siiso Jaalle Xaaji Maxamed Axmed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 150.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 10.4.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Xaaji Cabdi Rooble.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War. Lam. 0072082 laga sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaali yeed L/Baydhabo kuna jirto lacag dhan sh.so. 26.350/ kuna qoran magaca J/le Hoganka Saadka Ciidanka As luubta Sida ku cad warqadda lam. 13317, ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Qeybta Xis. Guud

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0072082 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Baydhabo kuna jirto lacag dhan sh.so. 26.350 kuna qoran magaca J/le Hoggaanka Saadka Ciidamada Asluubta.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Gancsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Baydhabo in ay siiso J/le Xaaji Cabdi Rooble lacagta Cadeyntu tahay sh.so. 26.350 oo ah bedelkii Buug keydka kor ku qoran mark ay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga billaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed. Haddii inta ka horaysa wax Ishortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 6.4.88.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR.

Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.